



SHARCIGA DHISMAHA EE
(CEELKA BIYAHA EE XIIN BARWAQO.)



MUQDISHO-SOOMAALIYA

2023



MASAWIRKA MILKIILAYAASHA

Abdirashid Moalim Salad



Mohamed Abdi Hassan



UJEEDO:- DHISID SHARCIGA CEELKA BIYAHA EE XIIN BARWAQO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **02/04/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid Mudanahaan hoos ku Xusan:-

1- **ABDIRASHID MOALIM SALAD**, Somali ah, ina Faadumo Maxamuud Caamir Degan Muqdisho, Lehna National ID.l.r.26401012899193.

2- **MOHAMED ABDI HASSAN**, Somali ah, ina Muno Mohamed Jimale Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport.l.r. P01224839.

Mudanayaasha kor ku xusan iyaga oo caafimaad qaba, caqligoodunu taam yahay, cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxey i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharciga Ceelka Biyaha Xiin Barwaqo oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA CEELKA
MAGACA CEELKA BIYAHA EE XIIN BARWAQO**



MUDADA JIRITAANKA SHARCIGA CEELKA

Mudada Sharciga Ceelka uu jirayo waa muddo 100 sano ah oo laga bilaabo malinta qoralkaan la canshuuro laguna qoro buugga shirkadaha Maxkamada Gobolka Banaadir, hase yeeshee mudadaas waa la kordhin karaa waana la baabi'in karaa waa haddii loo baahdo.

QODOBKA 3-AAD

RA'SUMAALKA CEELKA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.

- Raa'sumaalka Ceelka waa \$43,500 (Afartan iyo Sadax kun iyo Shan Boqol oo dolarka Marekanka) Waxaana ku talagalka Ceelka yahay in Raa'sumaalka Ceelka waa la kor dhinkaraa ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub.

MAGACA	LACGTA	BOQOLEY
ABDIRASHID MOALIM SALAD	\$21,750	%50
MOHAMED ABDI HASSAN	\$21,750	%50
GUUD:-		100%



QODOBKA 4-AAD
UJEEEDADA CEELKA

- Bixinta Adeeg Biyo
- Gudashada Howl kasta oo la xiriirta maalgelinta dalka.
- Abuuridda dakhli Cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub oo ku haboon duruufaha dalka.
- In ay qayb wayn ka qaadato dhisidda dhaqaalaha iyo horumarka bulshada Somaliyeed
- In ay abuurto ila dhaqaale iyo adeegyo ay ka faa'idaystaan Bulshada qeybaheeda kala duwan.

QODOBKA 5-AAD
XARUNTA CEELKA

Xarunta Ceelka waa magaalada Muqdisho Ee caasimadda Soomaaliya, Gaar ahaan Degmada Y/shiid Wuxuuna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kara dhammaan dalka gudihisa iyo dibaddiisaba.

QODOBKA 6-AAD
XISAABTA SOCOTA EE CEELKA

Waxaa xisaabta socota ee Ceelka la xirayaa bisha Sako ee sanad walba.

QODOBKA 7-AAD
FAA'IIDADA IYO QASAARAH A CEELKA

Faa'iidada ama qasaaraha Ceelka waxaa loo qeybsanayaa qeybo isla'eg oo la xiriira qofku saamiga uu ku leeyahay Ceelka.

QODOBKA 8-AAD
MALKIILAYAASHA CEELKA

Gudoomiyaha Ugu Horreeya Ee Ceelka Waxaa Loo Magacaabay Mudane **ABDIRASHID MOALIM SALAD** Oo Jagadaas Heynaya Inta Laga Bedelayo Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Ceelka, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Ceelka Rahana Gelin Karo Hantida Ceelka , Kana Saari Karo U Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Ceelka Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Ceelka .Marka Uu Maqan Yahay Gudoomiyuhu Waxaa Shaqadiisa Sii Wadaya G/Kuxigeenka Ceelka Mudane **MOHAMED ABDI HASSAN** Wuxuuna Qaban Doonaa Shaqadii Uu Gudoomiyuhu Qaban Lahaa Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Ceelka Rahana Gelin Karo Hantida Ceelka , Kana Saari Karo U Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Ceelka Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shikado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Ceelka



QODOBKA 9-AAD
TIRADA DADKA AA'SAASHA CEELKA

- Ceelka waxaa aa'saasay 2, qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay 2, xubin oo ah milkiilayaasha Ceelka, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, ayaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka Ceelka.
- Xeer hoosaadka Ceelka ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aa saasaha Ceelka. Waxa ayna xeer hoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee Ceelka.

QODOBKA 10-AAD
FADHIYADA HOW-WADEENNADA CEELKA

Fadhiga How-wadeenada Ceelka waxaa isugu yeeri karaa Guddoomiyaha Ceelka iyo ciddii kale ee uu u idmado waana in lugu war galiyaa xubnaha Ceelka 07 cisho ka hor meesha shirku ka dhacayo loona sii cayimo oo loo sii sheego.

QODOBKA 11-AAD
CODKA SAAMILEEYDA

Codka saamileyda Ceelka waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha Ceelka ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

QODOBKA 12-AAD
ISTICMAALIDDA ASTAANTA CEELKA

Astaanta Guud ee Ceelka waa Astaanta kor ku dheggaan wixii aan loo isticmaalin waxaa loo arkayaa inaysan ka tarjumeyn Ceelka.

QODOBKA 13-AAD
XUBINTII GEERIYOOTA

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha Ceelka waxaa saamiyiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in Ceelka ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

QODOBKA 14-AAD
KABIXITAANKA CEELKA

- 1-Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda Ceelka.
- 2-Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan Ceelka.
- 3-Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca Ceelka
- 4-Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

QODOBKA 15
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
15 QODOB 1 COVER, 5 BOG IYO 2 QORJINAAL IYO KOOBI AH.




SAXIIXYADA MILKIILAYAASHA

ABDIRASHID MOALIM SALAD

&

MOHAMED ABDI HASSAN







(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.645/T.P.N/23, Tr. 02/04/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Ceelka Xiin Barwaqo ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruuca madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay Saxiixayn milkiilayaasha Ceelka, Nootaayaduna waxey hubisay magacyadooda in ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixa kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"





JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC

WARAQADDA AQOONSIGA


بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/ رقم الهوية / National ID

26401012899193



Magaca / الاسم / Name

ABDIRASHID

MOALIM SALAD



Taariikhda dhalashada / الميلاد / Birth

01 Jan 1964

HOBYO

Taariikhda la bixiyay / الاصدار / Issue

07 Jan 2021

MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo / الانتهاء /

06 Jan 2026

Lab / Dheddig / الجنس / Gender

MALE






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 02/04/2023

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed Siyaad** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/rashiid Macalin Salaad** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 645/W.P.N/23, Tr. 02/04/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	C/rashiid Macalin Salaad
Taariikhda Caddeynta	02/04/2023

Loo Caddeeye: Aniga oo ah **C/rashiid Macalin Salaad**, Leh Tel No. **0615376480** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed Siyaad

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/rashiid Macalin Salaad